



Muxuu yahay Bridge UP!?

Bridge UP! Waa manhaj waxbarasho oo loogu tala galay macalimiinta, ardayda, iyo qof kasta oo danaynaya sayniska iyo xisaabta. Manhajkan waxaad ka helaysaa macluumaad ku salaysan naqshadeynta iyo dhisida buundooyinka aas aaska barashada.


- iBook fasalada K-3
- Habka internetka fasalada 4-8
- Casharada diyaarsan ee (qaabka pdf) – Bridge UP! fasalada K-12

Manhajka Bridge Up! waa mid waafaqsan heerka tayada waxbarasho ee Minnesota iyo Wisconsin oo isla markana si fudud loo isticmaali karo loona bedeli karo sidii la rabo. Waxaa qoray macalimiin UNA qoray macalimiinta.



www.mndot.gov/stem

Waxyaalaha oo dhan waxaa lagu soo degsan karaa si bilaash ah.



Manhajka STEM ee macalimiinta ee *bilaashka ah*, ardayda ama *qofkasta* oo danaynaya sayniska iyo xisaabta.

m DEPARTMENT OF
TRANSPORTATION



“Bridge UP ! waxay ardayda ka caawisaa in ay si fir fircoon *uga qayb qaataan* habka dhisidda buundooyiinka taas oo *saamaysa* oo *bedeshana* bulshooyinka.”
- Doug Petty Macalinka seyniska Dugsiga Sare ee Nawaaxida Stillwater

Yaa loogu tala galay Bridge UP! goormaase la isticmaali?

Waxaad Bridge UP! la isticmaali kartaa manhajkaaga sayniska adiga oo aan u baahnayn tababar dheeri ah. Siyaabaha kale ee loo isticmaali karo waxaa ka mid ah:

- Casharada qaarkood waxay ku haboon yihiin inaad u haysato bedel ahaan.
- Waa manhaj wanaagsan oo loo isticmaali karo barnaamijka iskoolka kadib (after school) ee raba in ay sameeyaan waxbarasho xiiso leh oo ku saabsan STEM.

Sidee ayay Bridge UP! iigu haboon tahay?

Bridge UP! waa BILAASH waana hab wanaagsan oo aad caruurta ugu xidhiidhin karto cilmiga ingineerin (engineering) ee khusseya waxbaayaha agteena ah. Qof kastaa wuu maraa buundo/kubri wuuna ag maraa.

MnDOT waxay bixisaa macluumaad kale sida goob booqasho, qof idiin khudbadeeya, dad waxbara, bandhigyo. Nala soo xiriir!

Maxay tani muhiim ugu tahay MnDOT?

Waa muhiim in la shaqaaleeyo shaqaale kala duwan oo xirfad leh oo kasoo jeeda dadka kala duwan ee Minnesota.

- Waxaa la filayaa in Minnesota ay 8% kor u kacdo waaxda STEM sanadaha 2014 ilaa 2024, taas oo ka badan saadaasha koboca shaqooyinka iyo tirada xirfadleyaasha baranaysa cilmiga STEM. (isha: mncompass.org)
- Kala duwanaanshaha dadka baranayay cilmiga STEM mayna isbedelin 20kii sano ee lasoo dhaafay.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeri ah?

Marcia Lochner - Isuduwaha Waxbarashada iyo Gaarsiinta (Education and Outreach Coordinator)

Email: stemoutreach.dot@state.mn.us

Talefoonka: 651-366-3097

m DEPARTMENT OF
TRANSPORTATION

www.mndot.gov/stem